

## Baaritaanka korriinka carruurnimada ee hore

Su'aalaha baaritaanka korriinku waxay gacan ka geystaan fikrada ah sida uu ilmuhu wax u baranayo, u korayo isla markaana u gaarayo korriinka muhiimka ah. Qalabka baaritaanka korriinku wuxuu gacan ka geystaa sheegida haddii ilmuhu ka faa'iidayso karo baaritaanka ama adeegyada si ay uga caawiyaan waxbarashada. Wixii macluumaad dheeraad ah, weydii dhakhtarka ilmahaaga ama la xiriir Xarunta Waxbarashada Hore ee degaankaaga: <https://oregonearlylearning.com/what-are-hubs/>

## Talaallada

Barnaamijka ERDC wuxuu carruurta uga baahan yahay in ay dhammeystaan talaalada. Qoysasku waxay ku jiri karaan hawsha dhammeystirka talaalada ama yeelan karaan sabab caafimaad ama aan caafimaad ahayn oo aysan u qaadan talaalada. Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir maamulka caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga: <https://www.oregon.gov/oha/PH/PreventionWellness/VaccinesImmunization/Pages/index.aspx>. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan talaalada, booqo <https://www.cdc.gov/vaccines/schedules/easy-to-read/child.html>.



## Barnaamijka Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Wac 503-378-3486, ama email u dir [CHILDCARE.policy@dhs.oregon.gov](mailto:CHILDCARE.policy@dhs.oregon.gov). Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

DHS 9863 (03/2022) Somali

# Waxa ay Tahay In Qoysaska Ogaadaan ee ku saabsan Barnaamijka Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta



**Qoysasku waxaa suuragal ah in ay helaan caawimaad la xiriirta kharashyada daryeelka carruurta iyada oo la adeegsanayo barnaamijka Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta (ERDC).** Waxaa dhici karta in aad u qalanto haddii aad shaqeyso ama haddii aad shaqeyso oo aad dugsi aadayso. Ka dib markii lagu oggolaado ERDC waxaad sii wadan karaa in aad hesho caawimaad la xiriirta kharashyada daryeelka carruurta marka shaqo la raadinayo ka dib shaqo la lumiyo, inta lagu jiro fasax caafimaad ama loogu talagalay kala guur ciidan.

### Aaditaanka dugsiga

Haddii aad dhiganayso dugsi oo shaqeynayso in ka yar 40 saacadood todobaadkii, waxaa dhici karta in aad u qalanto caawimaad la xiriirta kharashyada daryeelka carruurta inta lagu jiro saacadaha ardayga iyo sidoo kale saacadaha shaqada.

- Saacadaha aad dhigato dugsigu ma noqon karaan kuwo ka badan saacadaha la isku oggolaaday in la shaqeyo.
- Waa in aad dhiganaysaa dugsi la oggol yahay si loo helo taageerada dhaqaale ee federaalka.
- Waxbarashadu waa in ay noqotaa mid horumarisa fursadaha shaqo. Tani waxaa ka mid ah dhammeysashada shahaadada, GED, shahaado ama aqoonsi kale.

### Shaqo raadinta

Haddii aad la kulanto shaqo lumis ama fasax gaaban oo ah dhanka shaqada, waxaa dhici karta in aad u qalanto caawimaad la xiriirta kharashyada daryeelka carruurta inta lagu jiro saacadaha shaqo raadinta. Tani waxay ku siin doontaa wakhti aad ku hesho shaqo cusub.

- Ma bixin doontin copay inta lagu jiro wakhtiga shaqo raadinta.
- Saacadahaaga daryeelka carruurta ee ODHS isma beddeli doonaan. Waxaad sii wadan kartaa in aad ilmahaaga(carruurtaada) u qaado daryeel bixiyahooda carruurta.

### Fasaxa caafimaad

Haddii aadan hadda ka dib shaqeynayn sababa la xiriirta xaalado caafimaad awgood ama ku jirto fasaxa uur lahaanshaha, waxaa dhici karta in aad u qalanto caawimaad la xiriirta kharashyada daryeelka carruurta inta lagu jiro fasaxa.

- Ma bixin doontin copay inta lagu jiro wakhtiga fasaxa caafimaad.
- Saacadahaaga daryeelka carruurta ee ODHS isma beddeli doonaan. Waxaad sii wadan kartaa in aad ilmahaaga(carruurtaada) u qaado daryeel bixiyahooda carruurta.
- Waxaa dhici karta in aad u baahato bixinta kuwa soo socda:
  - Caddeynta fasaxa caafimaad;
  - Nooca jirada ama dhaawaca; iyo
  - Inta uu le'eg yahay ee la filayo in fasaxa caafimaad uu sii jiro.

### Kala gurka ciidanka

Marka aad ka soo noqoto shaqo ciidan oo aad ka haysay goob dagaal, ERDC waxay kaa caawin kartaa kharashyada daryeelka carruurta inta lagu jiro fasaxa inta aad ku jirto kala gurka.

### Barnaamijyada Daryeelka Carruurta

Waxaad dooran kartaa in aad isticmaasho barnaamijka daryeelka carruurta oo ruqsad ka haysta gobolka Oregon. Waxaad sidoo kale awoodi kartaa in aad isticmaasho saaxiib ama qaraabo. Waxaad yeelan kartaa wax ka badan hal daryeel bixiye.

Bixiyahaaga(yaashaada) daryeelka carruurta ayaa u baahan doona in ay dhammeystiraan habka liiska haddii aad daarato daryeel bixiye aanan isla hadaba ahayn daryeel bixiye ay ODHS oggolaatay. Si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato sida barnaamijyada daryeelka carruurta u noqdaan kuwo liiska ku jira oo qoran isla markaana loo oggolaado, booqo <https://www.oregon.gov/dhs/ASSISTANCE/CHILD-CARE/Pages/Provider-Listing.aspx>. Daryeel bixiyahaagu wuxuu sidoo kale la xiriiri karaa Kooxda Lacag Bixinta Tooska ah (DPU)

ama hay'adooda Child Care Resource & Referral (CCR&R) wixii caawimaad ah ee la xiriirta nidaamka. DPU kala xiriir 503-378-5500 ama 1-800-699-9074. CCR&R kala xiriir 1-800-342-6712 si aad u ogaato xafiiska kuugu dhow.

### Adeegso Spark si aad U hesho Daryeel Tayo oo leh oo loogu talagalay Ilmahaaga

Barnaamijyada taageerada ee Spark waa in ay noqdaan waxa ugu fiican ee ay u noqon karaan ilmahaaga iyo qoyskaaga. Xirfadlayaasha daryeelka waxbarashada hore ee qaybta ka ah Spark waxaa ka go'an bixinta waayo-aragnimada waxbarashada hore oo tayo leh oo loogu talagalay ilmahaaga. Barnaamijyada hela heerka qiimeynta ee Spark waxay ku saleysan yihiin heerarka lagu dhaqmo ee tayada ee horumarinta carruurta, caafimaadka iyo badbaadada, shahaadooyinka/aqoonsiyada shaqaalaha, hawl-wadaagayaasha qoyska, iyo nidaamyada ganacsi. Ka shaqeynta goobaha ku saleysan xarunta iyo guriga labadoodaba, waxay matalaan oo ka soo jeedan meelo kala duwan iyo luqaddo, sida qoysaska kala duwan ee Oregon. Ma daneynaysaa in aad waxyaabo dheeraad ah ka ogaato waxa macallimiinta waxbarashada hore qabtaan si loo helo heerka qiimeynta ee Spark? **Si aad u akhrido waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan Spark iyo sida loo helo Barnaamijyada Ay Qiimeysay Spark, booqo: <https://oregonspark.org/families/>.**

### Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijka ERDC iyo sida loo dalbado booqo:

- <http://www.oregon.gov/DHS/assistance/child-care/pages/index.aspx>.
- **La xiriir khadka bilaashka ah ee 211info:** Wac khadka bilaashka ah ee 211; Zip code-kaaga fariin telefoonka ugu dir 898211; email-ka [help@211info.org](mailto:help@211info.org); ama booqo [211info.org](http://211info.org).